



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
Ministry of Information, Culture & Tourism  
Office of the Minister

Date: 09/08/2019

**BAAQ NABADEED**

Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya waxay iyadoo ka xun tacsi tiiraanyo leh u diraysaa Madaxweynaha, Xukuumadda, Shacabka reer Koonfur Galbeed iyo qoysaskii ay ka baxeen dadkii ku dhintay dhacdadii naxdinta lahayd ee saaka ka dhacday degaanka degmada Baydhabo oo ay ku nafwaayeen 5 ruux oo qiimo badan ahaa.

Waa nasiib daro ah in Shacabka Soomaaliyeed oo dagaalo iyo deganaan la'aan ku soo jiray mudo dheer weli laysku dilayo qaab beebleed. Dawladda Soomaaliya waxay ugu baaqaysaa beelaha wax dhixmareen, Odayaasha dhaqanka, Culimada iyo waxgaradka reer Baydhabo in ay arinta gacan ku dhigaan oo Madaxweynaha, maamulka iyo ciidamada amniga ku gacan siiyan in aan dhib dambe dhicin, wixii dhacayna iyo wixii laysku hayona laga xaalo oo gogosha nabada laysugu yimaado.

Dawladda Soomaaliya ee heer Federaal iyo Maamul Goboleed waxay isha ku hayn doonaan cid kasta oo aan dhibka dhacay xalkiisa ku maqnayn, ee dhinaca kale abuuraysa fidmo cid kale oo qiimo lihi inoogaga dhimato, waxaana laga qaadi doonaa talaabo sharciga waafaqsan.

Waxaanu Madaxweynaha, guud ahaan maamul Dawlad Goboleedka Koonfur galbeed iyo shacabkaba Ilaal uga baryaynaa in uu siiyo nabad, horumar iyo Barwaqaqo.

Dhammaad